

Adiga ka hadal sii aqri ...

Sida wax loo qabto

Tallaabada 1

Aniga waxaan halkan ku soo lifaaqay warqad kuu sheegeyso inta aan ka ogsoonahay arrimahaaga iyo xaaladdaada. Aniga waan kuu soo sharaxay sida aan go'aankeyga u gaarayo teeda kale waxaa laga yaabaa in aan ku waydiiyey su'aalo.

Tallaabada 2

Adiga waa in aad iminka ka soo jawaabtaa warqaddan. Ii soo sheeg haddii akhbaarta aan kaa hayo ey sax tahay. Ii sheeg waxii kale ee aad rabtid in aan ogaado kana soo jawaab waxiisu'aalo ah. Tani waa muhiim maadaama aad fursad u leedahay in aad hubisid in aan heysto dhammaan akhbaarta aan u baahan ahay si aan go'aanka saxda ah u gaaro.

Tallaabada 3

Markii jawaabtaada aan helo, aniga go'aan ayaan gaarayaa haddii aanan u baahneyn akhbaar dheeraad ah. Haddii aadan ka soo jawaabin, waxaa laga yaabaa in aan gaaro go'aankayga aanna isticmaalo akhbaartii aan hore kaaga hayey. Aniga waxaan kuu soo dirayaa go'aan qoraal ah warqadda koobigeedana waxaan u dirayaa Jobcentre Plus.



Intey qaadaneysaa

Sida deg degga ah ee adiga iigu soo jawaabtid, ayaan anigana dhaqso go'aankeyga ugu gaarayaa. Tani waa toddobaad gudahiisa ka dib markii aan kaa helo jawaabtaada.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah

Annaga waan ku dadaalaynaa sidii aan kuugu caawin laheyn. Taleefankan naga soo wac **0800 096 1926** inta u dhaxayso 9 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo Isniinta ilaa iyo Jimcaha. Adiga toos waxaa kaaga qaban doono qof ku caawin kara. Taleefanka waa lacag la'aan markii aad naga soo wacdid kan guriga. Haddii aad isticmaashid taleefanka gacanta, annaga ayaa kugu soo celineyno.

Sida jawaabo loo celiyo

Adiga waxaad ku jawaabi kartaa dhinaca taleefanka ee ah **0800 096 1926** inta u dhaxeyso 9 subaxnimo iyo 4:30 galabnimo Isniinta ilaa iyo Jimcaha. Haddii aad naga soo wacdid taleefanka guriga waa lacag la'aan. Annaga ayaa kugu soo calineyno haddii aad isticmaashid taleefanka gacanta. Badanaaba toos ayaad u soo geli kartaa. Tani waa tii ugu dhaqsada badneyd ee lagu soo jawaabi karo. Annaga waan kaa qoreynaa jawaabtaada markaa ka dibna waan kuu aqrinaynaa wixii aan kaa qornay ee aad noogu sheegtay taleefanka. Waxaan kuu soo diraynaa koobi oo ah wixii aad noo sheegtay iyo go'aankeenaba.

Adiga waxaad ku jawaabi kartaa qoraal,

adoo isticmaalaya Foomka jawaabcelinta iyo bashqadii aan annaga kuu soo dirnay.

Haddii adiga aad dooneysid in aad nala hadashid ama aad rabto in aad warqad noogu soo qortid luqad kale, annaga waa kuu heli karnaa. Naga soo wac taleefankan **0800 096 1926** markaa annaga ayaa kaala tashan doonna.

Haddii aadan indhaha si fiican wax uga arkin ama dhegaha si fiican wax uga maqlin

Haddii aad aragga dhibaato kaa haysato aadna ku dooneysid waraaqahayaga qoraalka indhoolaha ee Braille ama qoraal waaweyn, fadlan naga soo wac **0800 096 1926**.

Haddii aad dhagaha la'dahay ama aad dhega culus tahay aadna heli karto taleefanka qoraalka, soo saara waxaad naga soo wici kartaa **0800 096 1929**

Haddii aad dacwo qabtid ama ashtako

Haddii aadan ku qanacsaneyn shey ka mid ah adeegyadeena, fadlan nala soo xiriir. Taleefankan lacag la'aanta ah ayaad naga soo wici kartaa **0800 096 1928** ama warqad noo soo dir ku socoto Independent Review Service, Freepost.

Siyaasadeena ee ah xagga sirta waxey kuu macnaynaysaa sida aan u isticmaalno akhbaarataada aad na siisid annaga. Sida aad ku heli kartidna waa in aad soo codsatid ama aad gashid bogga internetka ee ah www.irs-reiew.org.uk